


**Waayahay, waxa aan ku jiraa mid ka mid ah qolyahaa muhaajiriinta ah ee la qoray. Marka ma helayaa SSI?**



**Fiio Gar ah #1 – Wakhtiga Shaqada:** Wakhtiga uu ninkaaga/xaaskaagu shaqeyay waxaa loo xisaabinyaa inaad adigu shaqaysay. Hadii aad wadanka timid adigoo caruur ah wakhtigii waalidkaa shaqeeyeen ee aad caruurta ahayd waa lagu xisaabin karaa. Arintan fahamkeedu wuu adag yahay. Sidaa darteed SSA wuxuu kaa caawinayaa si'aad u ogaatid wakhtigii aad shaqaysay.

Ma xisaabsan kartid wakhtigii shaqada ee ka dambeeyay bishii December 31, 1996 hadii ay dawladu ku siisay gargaar sida (AFDC, Food Stamps, SNAP, MA or MFIP) isla bishaas. Waydii waaxda SSA ama garyaqaan si'aad faahfaahin u heshid.

**Fiio Gaara #2 – Askarta Hmong ah iyo askarta hawlgabka ah ee wadanka la keenay:**

Askarta Hmong ah ee la dagaal galay CIA markuu socday dagaalkii Fiitnaam looma tixgelinayo inay yihiin "Askar hore oo Maraykan ah" sida sharciga Maraykanku dhigayo.

Hadii aad tahay askari hore ciidamada maraykanka uga tirsanaan jiray ama aad weli ka tirsan tahay wadankana ku timid codsi ay qaraabadaadu ku soo codsadeen wixii ka dambeeyay bishii December 12, 1997, oo ay qaraabadaadu ku keentay, dawladu waxay u tixgelinaysaa in dakhligaa iyo hantida qofka ku keenay iyo lamaaniihiisu ay yihiin dakhli iyo hanti aad adigu leedahay waana lagu xisaabinayaa. Waxaa laga yaabaa in taasi keento in dakhligaagu ka bato intii laguugu ogolaan lahaa SSI. Laakiin, hadaadan haysan cunto iyo hoy sababtuna tahay in qofkii ku keenay uuna ku caawinayn waxaa laga yaabaa in lagu caawiyo. Sidoo kale waa suurto gal in caawimo lagu siiyo hadii uu dhib kuu gaysto qofka aad is qabtaan ama waalidkaa isla markaana aad ka guurtay qofkii dhibta kuu gaystay sidaa darteedna aad caawimo u baahan tahay dhibta lagu gaystay darteed.